



Työ- ja elinkeinoministeriö
Arbets- och näringsministeriet

Somali, uutinen 9.4.2020
Tietoa koronaviruksesta useilla kielillä

Macluumaad ku saabsan feyruska korona oo ku qoran luqado kala duwan

Dad badan ayaa ka walwalsan in ay dadka ku hadla luqadaha kale heli waayaan macluumaad ku filan oo ku saabsan korona feyruska. Macluumaad xafiisyada dowladda ka soo baxa oo ku qoran luqado kala duwan ayaa lagu ururinayaa oo laga soo saarayaa bogag internetka ah oo badan oo kala duwan. Warbixinta dhibkeedu waxa weeyaan inay ku kala daadsantahay meelo badan aynanna gaadhin dadka luqadaha kale ku hadla dhamaantood. Taas waxay keeni kartaa in bulshooyinka luqadaha kale ku hadla ay heli waayaan macluumaad ku filan oo ku saabsan korona feyruska iyo saamayntiisa.

Si loo gaadhsiiyo warbixinta bulshooyinka kala duwan ee luqadaha kale ku hadla waxa muhiim ah in la adeegsado shabakadaha kala duwan ee macluumaadka la marin karo sida sooshal mediada iyo ururada ka shaqeeya arrimaha soo galeetiga. Internetka macluumaad badan oo ka hadlaya feyruska koronada ayaa ku jira. Macluumaadka muuqaalka, sawirka iyo maqalka ah waxa ka faa'idaysan kara dadka akhriska iyo qoraalku uu ku adagyahay ama anan aqoon u lahayn.

TEM iyo xarunta aqoontu waxa ay ku dadaalayaan inay horumariyaan faafinta warbixinada luqadaha kala duwan yaga oo la kaashanaya haayadaha wadashaqayntu ay ka dhaxayso.

Xafiisyada dowladda iyo haayadaha kale macluumaadka ay diyaariyeen ee luqadaha kale ku baxaya waxa laga heli karaa tusaale ahaan bogagga internetka ee infoFinland.fi iyo kotouttaminen.fi. Sidoo kale YLE ayaa soo saara macluumaad ku saabsan korona feyruska oo luqado kala duwan ku baxa.

- [Wasaaradda shaqada iyo qutulduuriga warbixinta ay soo saareen ee lagaga hadlayo saamaynta uu korona feyrusku ku leeyahay shirkadaha, shaqada iyo kaydka qalabka daryeelka iyo raashinka](#)
- [Wasaaradda arrimaha bulshada iyo caafimaadku warbixinta ay soo saartay oo ku qoran 20 luqadood oo af dhagoolku uu ku jiro oo ku socota muwaadiniinta](#)
- [Macluumaadka luqada kala duwan ku qoran ee ku saabsan korona feyruska oo ku yaalla bogga kotouttaminen.fi](#)
- [Degmooyinku macluumaadka kala duwan ee ay soo saareen ee ku saabsan korona feyruska oo ku qoran luqadaha kala duwan– kotouttaminen.fi](#)
- [THL iyo hayadaha kale ee dowladda iyo degmooyinka macluumaadka ay kaga hadlayaan korona feyruska](#)
- [Macluumaad ku saabsan feyruska koronaha oo ku qoran af carabi, af soomaali, af kurdi iyo af farsi ee ku qoran yle.fi](#)
- [Warbixinta ku saabsan korona feyrusku ma wada gaadhayso bulshooyinka luqadaha kala duwan ku hadla, war soo baxay 3.4. \(ku qoran af finish\)](#)